

GARGAARKA DHAQAALAHAA EE REGIONS HOSPITAL

Regions Hospital ayaa bixisaa gargaar dhaqaale. Macluumaadka ku saabsan u qalmitaanka, sida loo codsado, iyo sida dhaqaalaha gargaarka loo xisaabiyo ayaa si buuxda lagu sifaynayaa Financial Assistance Policy (Siyaasada Caawinta Dhaqaalaha) ee Regions. Si aad ugu hesho nuqulo lacag la'aan ah ee Siyaasada Caawinta Dhaqaalaha iyo foomka codsashada online ahaan, si aad ugu codsato nuqulo lacag la'aan ah boostada, ama aad ku codsato koontadaada MyChart. Wixii ah kugu caawinta habwaxqabadka codsiga, fadlan u booqo ama ula xiriir Regions sida soo socota:

Websaydka: [Regions Patient Accounting Financial Assistance Programs](#)

Goobta: Regions Hospital
Patient Financial Services
(Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka)
640 Jackson St
Saint Paul, MN 55101

Lambarada lagala xiriiro: 651-254-0842 (Kala Taliyeyaasha Dhaqaale)
651-254-4791 (Adeegyada Maaliyadda Bukaanka))
877-974-3600 (Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka – Lambarka lacag la'aanta ah)
651-254-1684 (Fakiska – Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka)
651-265-1034 (Ogow Kharashkaaga)

U QALMITAANKA: Regions Hospital ayaa u xisaabisa gargaarka dhaqaale iyada oo ku salaysan dakhliga reerka bukaanka marka la barbar dhigo waxa loo yaqaan Heerka Saboobimada Federaalka (Federal Poverty Line, FPL). Bukaannada dakhliga reerkoodu ka yar tahay 200% FPL ayaa heli doona dhimista ugu deeqsiga badan. Inta ka sarraysa 200% FPL, heerka gargaarka dhaqaale ayaa ku xirnaan doonta dakhliga reerka, tirada qoyska, iyo wadarta ugu dallacyada isbitaalka ee daryeelka. Fadlan u tixraac Siyaasada Caawinta Dhaqaalaha ee Regions wixii macluumaad dheeraad ah. Haddii u bukaan ka helay Regions daryeelka imerjansiga ama daryeel caafimaad ahaan loogu baahan yahay oo u qalmo gargaar dhaqaale, Regions ayaan ku dallici doonin in ka badan haddiyada guud ahaan lagu dallaco bukaannada leh caynsanaanta caymiska caafimaadka.

SIDA LOO CODSADO: Si ay u codsadaan caawimaad dhaqaale, bukaannadu waa inay buuxiyaan foom codsi ah oo ay ugu soo celiyaan Regions ayagoo adeegsanaya MyChart, shakhsi ahaan, boostada ama faakis iyaga oo isticmaala macluumaadka xiriirinta ee kor ku yaal. Bukaannada waxaa la weydiin doonaa inay bixiyaan dukumiintiyo xaqiijinaysa dakhliga (sida canshuur celinta federaalka ee dakhliga) dukumiintiyo xaqiijinaya hantida la dhaqaajin karo (sida koontada keydka/jekin-ga, saamiyo, iyo curaarta (bonds)) iyo macluumaad ku saabsan daboolida caymiska caafimaadka ee hadda ama suurtagalka ah (sida Medicaid, Medicare, ama caymis gaar loo leeyahay). Kala taliyeyaasha dhaqaalaha ayaa lagu heli karaa telefoon lambarka 651-254-0842. Fadlan u tixraac Siyaasada Caawinta Dhaqaalaha ee Regions wixii macluumaad dheeraad ah.

TURJUMAADYADA: Turjumadyada Siyaasada Caawinta Dhaqaalaha ee Regions, foomka codsiga, iyo sookoobka hadalka la fahmi karo ayaa lagu heli karaa luqadaha qaarkood iyada oo ku xiran beelaha aya u adeegto Regions. Si aad u hesho nuqullo turjuman, fadlan booqo barta internetka Regions ama weyddiiso nuqullo adiga oo isticmaala macluumaadka kula xiriirka korka.